

Macluumaadka raadiyaasha magangalyodoonka iyada oo la raacayo Qodobka 29 (3) EURODAC – VO (Shirka (EC) 603/2013 ee Golaha laga bilaabo 26.6.2013

Waxa aad ka fayl garaysatay Austria dalab dhawrista caalamiga ah. Haddaba, iyada oo la raacayo shuruucda caadiga ah ee khuseeya Austria (Midawga Yurub) faraha ayaa hadda lagaa qaadi.

Tan waxa samayn doonaa wakiil awood u leh ee Xafiiska Fadaraalka ama wakiil awood u leh oo ka tirsan adeegyada ammaanka dadwaynaha.

Xogta farahaaga ayaa loo eegi nidaamka “EURODAC” xogta faraha loo diray xubnaha kale ee Midawga Yurub iyo sidoo kale Norway iyo Iceland, Switzerland iyo Liechtenstein xogta xarunta dhexe, iyada oo la raacayo shuruudaha sharciga hadda jira. Ujeedada tan waa in si dhakhso ah loo abuuro dawladda reer yurub ee ka masuulka ah kiis magangalyodoon kaasi oo ku khuseeya, haddii ay dhacdo inaad hore ugu qaadatay wakhti waddan kale oo xukunka Dublin kujira.

Xogtaada waxa heli doona maamulada sharci ahaan Austria awooda u leh ee magangalyodoonka iyo ammaanka iyo bangiga xogta ee dhexe nidaamka - “EURODAC”. Haddii lama-huraan noqoto, xogtaada sidoo kale waxa heli doona dawladda/dawladaha xubnaha ka ah ee aad hore wakhti ugu qaadatay.

Haddii aad ka fayl garaysatay dalab magangalyodoon Austria (oo aad ka wayn tahay 14jir), Austria waxa saaran iyada oo la raacayo sharciga Midawga Yurub inay u sameeyaan faro qaadista ujeedada sare ku xusan.

Waxa aad xaq u leedahay inaad hesho macluumaad kusaabsan illaa xadka iyo asalka xogta faro qaadista ee kugu saabsan nidaamka - “EURODAC”.

Waxa aad sidoo kale dalbi kartaa in xogta sida dhabta ah u khaldan ay tahay in la saxo ama xogta sida sharciga ah loo hayo ay tahay in la jaro.

Macluumaad dheeraad ah fadlan u dhiib wakhtiga habboon shaqaalaha Xafiiska Fadaraalka ama maamulada ammaanka kuwaasi oo gacanta ku haya kiiskaaga. Magangalyodoon, raadiye ahaan, la-taliyayaasha sharciga ee Wasaaradda Fadaraalka ee Gudaha ee laan goboleedka ku tacaluqda ee Xafiiska Fadaraalka iyo sidoo kale la-taliyayaasha sharciga Wasaaradda Fadaraalka ee Gudaha ee xarunta soodhawaynta u horraysa ee ku tacaluqda ayaad heli kartaa.